BAARITAANKA SABABTA KEENTAY DHIMASHOOYINKA KA DHASHAY WEERARADII MASJIDKA EE 15 MARCH 2019

KAALMADA MINUTE-KA EE GARSOORE MARSHALL MARKA LOO EEGO BAAXADDA BAARITANKA

Minute-ka ayaa xaqiijinaayo in dhimasho baarista hadda la furay mid kasta oo ka mid ah 51 gii dhimasho. Furitaanka baaritaanku waa tallaabo rasmi ah oo hoos timaada Sharciga dhimashoi-baadhista taasoo ka dhigan in baaritaan dheeraad ah lagu sameyn doono dhimashooyinka. Dhageysiga dacwada baarista waxaa la qaban karaa iyadoo qayb ka ah baaritaanka.

Minute-ku wuxuu sidoo kale qeexayaa:

- Aasaaska hababka sharciga ee horeyba u dhacay sida xeer ilaalinta dembiyada iyo Guddiga baarista ee Boqortooyada
- soo koobida waxa qoysaska iyo ururadu ka codsadeen baadhitaanka dhimashdu inuu eego
- qaybaha khuseeya ee Xeerka Damasho-baadhista iyo raacida kiisas horay udhacay ee caawiya dhimasho-baadhaha si uu u go'aamiyo waxa baadhitaanka dhimashadu uu eegi karo iyo ah in uu eego; iyo
- Aragti horudhac ah oo ku saabsan arrimaha baadhitaanka sababta keentay dhimashada ayaa eegi doona.

Xeerka dhimasho-baadhayaasha ayaa qeexaya ujeedooyinka baaritaanka dhimashooyinka. Ujeedooyinkaas ayaa aasaas u ah go'aan ka gaarista waxa ay tahay in baaritaanka dhimashadu uu eego. Ujeedooyinka khuseeya waa:

- in la caddeeyo (haddii ay suurtogal tahay) yee ahaayeen dadka dhintay, waxa sababay dhimashada qof kasta, iyo xaaladdee bay ku dhinteen; iyo
- in la sameeyo faallooyin ama talooyin si loo yareeyo fursadaha dhimashada mustaqbalka ee xaaladaha la midka ah.

Dhimasho baadhaha ayaa go'aamin kara arrimaha ay tahay in la eego. Ma ahan in arrin kasta oo dhimashada la xidhiidha noqon doonto arrin u baahan in uu baadho; waa in mar uun xariiq meel laga jeexaa. Arrimo qaarkood sinaba meeysan sababeen dhimasho ama waxna meeysan ku darsadeen si kasta oo muhiim ha ahaatee. Dhimasho baadhaha waa in uu go'aamiyaa waxa lagama maarmaanka u ah, la doonayo iyo saamiga loo baahan yahay si loo go'aamiyo baaxadda baaritaanka dhimashada.

Qaar badan oo ka mid ah arrimaha la soo jeediyay ee baaritaanka sababta keentay dhimashada ayaa la xiriira xaaladaha ballaaran ee dhimashooyinka.

Arrimaha qaarkood ee la soo jeediyay ma awoodaan in ay eegaan baaritaanka kusaabsan sababta dhimashada sababtoo ah waxay ka baxsan yihiin awoodda sharci ee Dhimasho-baadhaha. Tan waxa ka mid ah arrimaha la xidhiidha arrimaha dhimashooyinka ka dib.

Arrimaha kale ee gaarka ah ee la soo jeediyay ayaa laga yaabaa in lagu wajaho habka macluumaadka la siinayo codsadaha ay khusayso. Tani waxay noqon kartaa macluumaad hore u

jiray ama waxay noqon kartaa macluumaad cusub oo uu helay Dhimasho-baadhaha si uu uga hadlo arrinta gaarka ah ee la soo jeediyay. Waxaa socota hawlo uruurin iyo gudbinta xogta looga jawaabayo arrimahan gaarka ah. Haddii arrimahaas gaarka ah aysan awood u lahayn in sidan wax looga qabto, waxaa la tixgelin doonaa haddii ay jirto baahi loo qabo in baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo arrintaas gaarka ah.

Arimaha qaarkood ee la codsaday in lagu soodaro baadhista dimashada waxa ka mid ah arrimo ay guddida baadhista Boqortooyadu hore u eegtay. Qaar ka mid ah qoysaska iyo ururada ayaa walaac ka muujiyay xaqiiqda ah in baaritaanka inta badan loo sameeyay si qarsoodi ah. Waxaa jira walaac ku saabsan in natiijada guddiga Boqortooyada lagu saleyn karo taas awgeed. Waxaa la soo jeediyay in dhowr arrimood oo isku mid ah ay tahay in uu mar kale dib u eego Dimasho-baadhaha.

Ma cadda sida dhimasho baadhitaanku uu si dhab ah u bixin karo daah-furnaan ka badan intii Guddiga Boqortooyadu uu awooday iney bixiyaan marka loo eego casaasiyada caddaynta qaarkood. Waxa kale oo jirta baahi loo qabo in laga fogaado laba-mar daabicida baadhitaanada oo aan loo baahnayn. Dhimasho-baadhaha ayaa go'aansan kara inaanu eegin dhinacyada xaaladaha dhimashada kuwaas oo ay si waafi ah u cadeeyeen baaritaano kale. Su'aasha muhiimka ah ayaa ah haddii ay jiraan dhinacyo ka mid ah xaaladaha dhimashada oo ay si waafi ah u dejiyeen Guddiga Boqortooyada ee Baaritaanka (ama danbi ku oogida danbiilaha) Marxaladan, waxaa la soo jeediyay in arrimihii ay eegeen Guddiga Baaritaanka ee Boqortooyada in hadana aan dib loogu eegin baaritaanka dhimashada

Arrimaha la xidhiidha dadaalka jawaab celinta koowaad iyo sida jawaabtaasi ay u saamaysay badbaadada qofka dhintay ayaa ah arrimo aanay tixgalinin Guddida Baaritaanka ee Boqortooyada Arrimahan waxaa loo so jeediyay in loo eego qayb ka mid ah dhimasho-baaritaanka.

Waxaa muhiim ah in la fahmo in aan weli go'aan kama dambays ah laga gaarin arrimaha ku saabsan dhimasho-baaritaanka ee ugu dambeyntii eegi doona. Minuteku waxuu dejinayaa bar bilow. Waxa ujiri doonta fursad dheeraad ah qoysaska iyo ururaduba si ay u sameeyan soo-gudbin arrimaha ah in lagu eego baaritaanka dhimashada. Soo-gudbintaanadan waxaa lagu samayn karaa (iyadoo loo marayo qareenkooda haddii ay mid leeyihiin) hab qoraal iyo qof ahaan ah marka la joogo dhageysiga maxkamadda ee Coroner Windley uu ku qaban doono Christchurch. Dacwad dageysigani ma aha dhageysi baaritaan, waa uun kaliya in la maqlo baaxada soo-gudbintaanada. Coroner Windley ayaa markaa go'aan kama dambays ah ka gaadhi doona arrimaha dhimasho baaritaanku uu eegi doono.

Qaar ka mid ah taariikhaha muhiimka ah ee mudan in meel lagu qorto/la xasuus naado

- Soo gudbitaano kasta oo qoraal ah oo ku saabsan arrimaha baaritaanka waa in la helaa ugu dambeyn **26 Noofembar 2021.** Soo-gudbitaanada waxaa loo diri kara coronial.response@justice.govt.nz.
- Dhageysiga maxkamadda ee arrimaha baaritaanka wuxuu ka dhici doonaa Christchurch **14-15 Diseembar 2021**
- Haddii dhinacyada xiiseenaya (ama qareenkooda haddii ay mid leeyihiin) ay rabaan inay sameeyan soo-gudbitaanada hab shakhsi ahaan xilliga dhegeysiga maxkamadda, waa inay noo sheegaan ugu dambayn **26 Noofembar 2021** si qabanqaabada loo sameeyo. Tan waxaa lagula talin karaa adigoo iimayl u soo diraya coronial.response@justice.govt.nz